


JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJKA

SAYNIS

FASAĀKA LABAAD

2



SAYNIS

FASALKA LABAAD

2

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

**Buggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin
ogolaansho**

DAABACAADDII LABAAD

**Waxaa lagu daabacay
Madbacadda Qaranka
XAMAR, 1976.**

H O R D H A C

Hore ugama ay dhicin taariikhda dugsiyada hoose ee dalkeenna in maadadda Sayniska lagu barto fasalka koowaad iyo kan labaad midnaba. Imika oo ah markii ugu horraysay ee taas oo kale ay dhacdo, waxa lagama maarmaan noqotay in carruurta fasalka labaad, loo dejiyo buug habaysan oo ku abuurra xiiso iyo jacayl xagga barashada Sayniska.


Buuggan oo loogu talagalay ardayda ku jirta fasalka Labaad ee dugsiyada Baraymariga, wuxu yahay mid ku fadhiya habka cusub ee carruurta Sayniska loo baro. Wuxu si weyn wax uga beddelayaa habkii hore ee dugsiyadeenna Sayniska looga baran jiray, wuxu dhiirri gelinayaa in ay carruurta iskood wax u baaraan, wixii ay arkaanna fiiro gaar ah u yeeshaan. Wuxu ilmaha dareensiinayaa in uu saynisku yahay barasho la xiriirta waxyaalaha agagaarkiisa ah ee uu maalin walba arko ama maqlo.

Xafiiska Manaahijtu wuxu mahad weyn u celinayaa **Muuse Xuseen Askar** iyo **Cismaan Jaamac Daahir** oo buuggan qoray iskuna dubbariday. Waxa kale oo mahad weyn uu u celinayaa **Cabdillaahi Riyaale** iyo **Idriis Maxamuud** oo buuggan sawirrada u sameeyey iyo dadkii buuggan garaacayba.

Maamulaha Xafiiska Manaahijta
Bashiir Faarax Kaahiye

QORRAXDA


Waqooyi



Xaggee bay Qorraxdu ka soo baxdaa?

Xaggee bayse ka dhacdaa?

QORRAXDA



Qorraxdu waa kubbad gubanayša.

Qorraxdu dhulka iyo dayaxaba aad bay uga weyn tahay.



U Fiirso labada sawir. Markeebaa duhur ah?

Harka waxa sameeya qorraxda.


Harka waxaynu ku qiyaasannaa waqtiga.




Markee ayuu dharku hor qallalayaa?
Xaggee bay biyihii qabteen?



U FIIRSO TIJAABADAN



Biyaha quraaradda qooyey xaggee bay ka yimaadeen?
Maxaa dhacaya haddii muddo badan kidhligu
dabka saarnaado?




Kulaylku biyaha uumi buu u roгаа.


Sidii aad tijaabada ka aragtay oo kale ayaa kulayka qorraxdu biyaha badda uumi ugu beddelaa.

Daruurtu waa uumi qaboobay.

Daruurtu roob ayay ina siisaa.




Dayaxu waa kubbad dhulka ku wareegta.
Ifka dayaxu wuu isbeddelaa.







Xiddiguhu waa Qorraxyo fog-fog.
Qaar yar-yar iyo qaar waaweyn bay isugu jiraan.



Ma taqaannaa magacyada
xiddigahan isu urursan.
Waydii macallinka ama qof weyn.



TAMARTA




Dabayl baa geedka ruxaysa.



Dabayl baa xashiishkan wadda.



Dabayl baa doonidan wadda




Dabayl baa matoorkan wadda.




Dabayshu xoog bay leedahay.

Xoogga dabaysha siyaabo badan baynnu u isticmaallaa.

BIYAHA SOCONAYA




Weli daad ma ka tallawday? Ma u fiirsatay xoogga daadka ?




Biyaha socdaa xoog bay leeyihiin ay wax ku dhaqaajiyaan. Waxyaabo badan baynu ku qabsanaa xoogga biyaha.

KULAYLKA




Furkan waxa tuuray kulaylka dabka.




Baabuurkan waxa wada kulaylka baatrootka gubanaya.


KORANTADA



Marawaxaddan waxa wada koranto.
Korantadu waxay leedahay xoog.




Waxan oo dhammi waxay ku shaqaynayaan
xoogga korontada




FUDUDAYNTA DHAQAAQA : SHAAGAGGA

TIJAABI


- 1) Dhawr buug saar miiska dushiisa, dabeed riix.



2) Haddana 2 qalin oo girgirra leh hoos dhig;
haddana riix.



3) Markan laba qalin oo giraansan hoos dhig; daba-
deedna riix.





Labadan tijaabo samee.





Markee bay riixiddu hawl yar tahay ?

Ma marka hore mise marka dambe ?

Labadan iyamay dabayshu dhaqaajin ogtahay ? Debedda ku
tijaabi.






Labadanna




Shaqada way hawl yareeyaan shaagaggu.

Aan samaynno baaburro shaagag leh sida kuwan.



BADBAADADA SUUQA

Shaagagga waxyaaba badan baynnu ku isticmaallaa




Joogso :

Hareeraha eeg. Markay waddadu bannaan tahay socio.



Markaad socoto hortaa da eeg.





Haddii Baabuur si kediso ah kuugu soo baxo kolba dhinac ha u cararin ee meeshaada joogso.



BADBAADADA GURIGA

Sagxadda qoyan ha ku dulsocon. Haddii aad biyo ku daadiso, qallaji.



Diirka muska iyo cambaha ha ku tuurin dhulka la mara'ayo.





Ha ku ciyaarin alaabta wax mudda ama wax goysa.



Korantada iska ilaali.



Haddii nabar ku gaaro tus qof weyn
Haddaad keligaa tahay biyo ku mayr dabeed mara nadiifa ku xir.



Daawo aan takhtar kuu qorin ha cunin.

MUXUU NOOLUHU U BAAHAN YAHAY?

Nooluhu wuxu u baahan yahay biyo iyo cunto.
Meesha aan biyo lahayn dhirtu kama baxdo.
Xayawaankuna kuma noolaado.



Dhirtu ma u baahan tahay biyo ?
Tijaabo:



Labada geed midba dheri ku beer.
Waxad dhigtaa meel ilays leh.
Labada geed midkood maalin walba
waraabi.

Ka kale biyo ha ku shubin.
Fiiri waxa ku dhaca labada geed.
Kee baa si wanaagsan u baxay?
Waayo?

Dhirtu sow biyo uma baahna?



Halkee buu geedku biyaha ku qaataa ?



Tijaabo:

Laba geed midba dheri ku beer.
Marka ay weynaadaan midkood
bac ku rid.
Bacda afkeeda ku xir jirrida geedka.
Koob biyo ah maalin walba ku
shub labada geed.
Fiiri waxa dhaca dhawr maalmood
kaddib.
Kee baa si wanaagsan u baxay?
Waayo ?



Geedku xididdada oo keliya ayuu biyaha ku qaataa.

Biyuhu waxay dhexmaraan jirrida.




Tijaabo:

Geed yar soo ruji.
Xididdada ka mayr carrada.
Biyo guduudan weel ku shub.
Geedkana ku rid weelkaa.
Ha ku jiro dhawr saacadood.
Ka soo saar biyaha.
Fiiri caleemaha iyo ubaxa geedka.
Midabkoodii ma isbeddelay ?

Makiinad ku kala jar jirrida.
Ma ku aragtaa dhibicyo gududan ?
Waxay ku tusaysaan inay biyuhu soo dhex mareen
jirrida.

Xayawaanku wuxu u baahan yahay biyo.


Xayawaanku ma noolaan karo biyo la'aan.
Maalin walba biyo ayaynu cabnaa.
Xayawaanka kalena biyaha way cabbaan.
Muxuu xayawaanku biyaha ugu baahan yahay?




Sidee buu xayawaanku biyaha u cabbaa ?

Ma aragtay Ey biyo cabbaya?
Carrabka ayuu biyaha ku cabbaa.
Bisad yar biyo ama caano sii.
Fiiri sida ay u cabto.

Ma aragtay shimbir biyo cabbaysa?
Bal digaagad biyo u dhig.
Eeg sida ay u cabto biyaha.



/// Kani waa awr biyo cabbaya.
Afka ayuu biyaha ku cabbayaa.
Kuwee baa ka mid ah xayawaanka
afka ku cabba biyaha?



Eeg sawirkan.
 Xayawaankan maxaa la yiraahdaa?
 Gacanka dheer ayuu biyaha ku nuugaa.
 Dabeedna afka ayuu ku shubtaa.
 Ma jiraa xayawaan kale oo sidan yeelaa?




Sidee buu dadku biyaha u cabbaa?

WAXA NOOLI WAXAY U BAAHAN YIHIIN CUNTO

Dhirtu ma u baahan tahay ilayska qorraxda?


Tijaabo:

Laba geed oo digir ah midba
 dheri ku beer.
 Midkood waxad dhigtaa meel
 cadceed ah.
 Ka kalena meel madaw ku xir.
 Maalin walba labada geed waraabi.
 Fiiri waxa dhaca dhawr maalmood
 ka dib.



Dhirtu ma u baahan tahay ilayska qorraxda?

Labada geed kee baa si wana-
agsan u baxay ?
Waayo ?





Dhirtu sow uma baahna ilayska qor-
raxda ?

Dhirtu ma u baahan tabay carro

Tijaabo:

Laba dheri soo qaado.
Mid carro ka buuxi.
Midna dhagxaan ka buuxi
Laba geed oo isku nooc ah
ku kala beer labada dheri.
Meel cadceed leh dhig.
Maalin walba waraabi
labada geed.
Eeg waxa dhaca.



Labada geed kee baa si wana-
agsan u baxay ?
Waayo ?

Dhirtu sow uma baahna carro ?

Dhirta hesha biyo, carro iyo ilays
ayaa si wanaagsan u korta.
Biyaha iyo carradu waa cuntada
Cayriin ee dhirta.
Waxay ku bislaysataa caleemaheeda.

Xayawaanku wuxu u baahan yahay cunto.

Dhirtu cuntadeeda way samaysataa.
Xayawaanku cunto ma samaysto.
Waa inay wax cunaan si ay u noolaadaan.
Xayawaanka badankoodu waxay cunaan xayawaanka
kale.

Xayawaanka qaarna waxay cunaan dhirta.

Sidee buu xayawaanku cuntada u helaa?




Xayawaanku wuxu cuntadiisa
ku heli karaa aragga.

Xayawaanku wuxu cunto ku
heli karaa urinta.



Xayawaanku wuxu cunto ku heli karaa
maqalka.




Xayawaanku wuxu ka faa'iidaystaa
indhihiisa, dhegihiisa iyo sankiisa
si uu cunto u helo.

Xayawaan badan baa cuna xayawaanka kale.



geg Sawirradan.
idee bay bisaddani
untadeeda u heshay?

bisaddu way gaaddaa
xayawaanka ay ugaarsanayso.




Xayawaanka qaar baa dabin
u dhiga cuntadooda.
Waxa ka mid ah Caarada.
Caaradu xuub ayay samaysa-
taa.


Cayayaan badan baa xuubka
ku dhaca.
Waxa ka mid ah duqsiga.



Ma filaysaa in duqsigani ka fa-
kado Caarada?




Xayawaanka qaar baa cuntadooda dhulka ka qota.
Cunto noocma ah bay helaan?
Magacaw xayawaan cuntadiisa dhulka ka qota.




Xayawaan badan baan cunin xayawaanka kale.




Maxay cunaan kuwa aad sawirkan ku aragtaa
Sidee bay u helaan cuntadooda?
Waxa ay cunaan miyuu ka fakadaa?







Xayawaanka qaar waxay cunaan
caleemaha geedaha.
Xayawaanka qaarna waxay cunaan
miraha geedaha.
Kuwo kalena waxay cunaan iniinyaha.

HALKEE BUU XAYAWAANKU CUNTADA KU QABSADAA



Xayawaankan magacii?
Wuxu cunaa cayayaanka.
Halkee buu cuntadiisa ku qabsadaa ?






Shimbirtani waxay cuntaa ca-
yayaanka.
Waxay leedahay carrab dhuu-
ban.
Carrabka ayay cuntadeeda ku
qabsataa.

Shimbirtan ma aragtay?
Eeg sawirkeeda.
Maxay samaynaysaa?
Maxay godkan u qodatay?
Waxay leedahay qaroobbe.
Qaroobbaha ayay cuntadeeda
ku qabsataa.



Shimbirtanna waxay leedahay
qaroobbe dheer.
Qaroobbaha ayay cuntadeeda
ku qabsataa.
Sidee bay ugu qabsataa ?






Xayawaanka qaar baa lugaha
ku qabsada cuntadooda.
Waxa ka mid ah shimbirtan.
Eeg sida ay u qabsato cunta-
deeda.




Xayawaankani waxay cuntadooda ku qabsadaan
lugaha
Sidee bay cuntada afka u gaarsiiyaan ?
Ma la mid tahay sida aad gacmahaaga
wax ugu qabsatid ?
Sheeg xayawaan kale oo sidan yeela.



Eygani cunto ayuu sitaa.
Halkee buu ku soo qabsaday?




Fiiri kalluunkan.
Cuntadiisa afka ayuu ku qabsadaa.





Ma aragtay xayawaan sidan u eg?
Sheeg qaladka ku jira.
Sidan ay yihiin cunto ma ku heli karaan ?


HALKEE BUU XAYAWAANKU CUNTADIISA KA HELAA ?



Shimbihani way indho fiiqan yihiin.
Cayayaanka duulaya ayay qabsadaan.
Cayayaanku wuu duuli ogyahay.
Waxaase ka duuli og shimbihani.
Sidee bay shimbihani u qabsadaan
cayayaanka ?



Halkee bay ku nool yihiin
xayawaankani.
Cunto noocma ah bay helaan?
Kuwee baa cuna xayawaanka kale ?
Ma ku jiraa mid dhirta cunaa ?






Xayawaankani waxay ku nool yihiin berriga.

Waxay cunaan cuntada ay berriga ka helaan.

Kuwee baa cuna xayawaanka kale ?

Kuwee baa dhirta cuna ?

Qaybtee bay kuwaasi dhirta ka cunaan ?




Xayawaankani berriga iyo biyhaba way ku noolaan karaan.

Labada meeloodba cunto ayay ka cunaan.

Fiiiri sawirradan.

Sheeg waxa ay cunayaan.

LAYLI SAWIR




Eeg sawirradan.

- b) Xayawaankan kee baa waqti walba biyaha ku nool ?
Halkee buu cuntadiisa ka helaa ?
- t) Kee baa hawada ka ugaarsada ?
Muxuu cunaa ?
- j) Kuwee baa cunto ka hela berriga iyo biyahaba ?

Halkee bay ku noolyihiin kuwaasi ?



Eeg sawirradan.






j) Halkee bay ku qabsadaan cuntadooda ?

Kuwanna eeg.



Kuwan kalena eeg.



- b) Sidee bay xayawaankani u helaan cuntadooda ?
- t) Dhammaantood ma waxay cunaan xayawaanka kale ?
- j) Halkee bay ku qabsadaan cuntadooda ?



Eeg sawirradan.


- b) dhirtan kuwee baa cuntadooda samaysta ?
- t) Halkee bay ku samaystaan ?
- j) Maxay u baahan yihiin inay helaan si ay cuntadooda u samaystaan ?

WAXA NOOLI WUU IS ILAALIYAA

Muxuu iska ilaaliyaa waxa nooli ?
 Cadawgiisa ayuu iska ilaaliyaa.
 Sidee buu cadawgiisa isaga ilaaliyaa ?

Ciddiyo iyo ilko






Xayawaanka qaarkood waxay isku ilaaliyaan
ciddiyo dhaadheer iyo miciyo.
Bisaddu waxay leedahay ciddiyo dhaadheer.
Ciddiyaha ayey cadawgeeda ku xagataa.
Ma aragtay bisad ama ey dagaallamaya?
Eygu wuxu leeyahay ilko fiiqan.
Ilkaha ayuu cadawgiisa ku qaniinaa.
Libaaxa iyo shabeelkuna waxay leeyihiin miciyo.
Magacaw xayawaan kale oo leh ciddiyo iyo miciyo?.

Geeso Fiiqan



Xayawaanka qaar waxay leeyihiin geeso fiiqan.
Maxay ku falaan geesaha?






Orgigu wuxu leeyahay geeso.
Ma aragtay laba orgi oo dagaallamaya ?
Maxay madaxa ugu dagaallamaan ?
Dibiga, wiyisha iyo biciidku waxay ka mid yihiin
xayawaanka geesaha isku ilaaliya.




Qaniinyo Sun leh

Xayawaanka qaar baa ciddiyo
iyo geeso midna aan lahayn.
Waxay leeyihiin qaniinyo sun leh.



Fiiri sawirkan. Ma aragtay dhirtaxanyo ?

Waxay ku nooshahay dhagxaanta hoostooda.
Afka ayey ku leedahay sun.




Masaska qaarkood afka ayay sun ku leeyihiin.
Haddii uu ku qaniino sun buu kugu mudaa.
Suntiisu way dishaa xayawaanka.
Ma aragtay dibqallooc.
Dabada wuxu ku leeyahay irbad yar
oo wax mudda.
Magacaw xayawaan kale oo sun leh.




QOLOF

Xayawaan badan baa leh qolof adag.
Qolofu waxay dahaartaa jirkooda.



Kani waa diin.
Wuxu dusha ku leeyahay qo-
lof weyn oo adag.
Marka uu cadaw arko wuxu
isku qariyaa qolofsiisa.
Magacaw laba xayawaan oo
isku ilaaliya qolofa?




Ma aragtay xaaxeeyo?
Xaaxeeyadu waxay dusha ku leedahay qolof adag.
Marka cadaw soo weeraro waxay isku qaristaa
qolofteeda.

OROD BADNI



Xayawaanka qaar baa orod badan.
Cadawgoda way ka orod badiyaan.
Bakayle sow maad arag?
Ma leeyahay ciddiyo dhaadheer?
Qolof adag ma leeyahay?
Ma sun buu wax ku dilaa?
Sidee buu cadawga isaga dhiciyaa?
Magacaw dhawr xayawaan oo cadawgoda
ka dhacereeya.



Shimbirtu way duushaa marka
ay cadaw aragto.



Xayawaanka qaar baa iska
dhiga wax dhintay marka ca-
daw soo weeraro.
Waxa ka mid ah hangaraara-
ca.
Bal qori yar ku taabo hanga-
raarac.
Maxaad argtay ?



Xayawaanka qaar baa cadawgooda
ka dhuunta.
Waxa ka mid ah raha.
Rahu wuxu ku dhuuntaa dhagxaanta
hoostooda.


Magacaw xayawaanno kale oo cadawgooda
ka dhuunta.



Fiiri sawirka xayawaankan
Maxaa la yiraahdaa ?
Midabkiisa ayuu beddelaa.
Hadba meesha uu fuushan yahay buu
u ekaadaa.
Sidaa ayuu cadawgiisa kaga baxsadaa.

Eeg sawirka
Keebaha qoray

Fiiri sawirkan diirta.
Ma taqaan midabkeeda ?
Waxay la midab tahay caleenta.
Ma filaysaa inay sidan cadawgeeda
kaga nabadgasho ?



Kani waa cayayaan.
Maxaa la yiraahdaa ?
Fiiri jirkeeda.
Way dhuuban tahay waanay cawlan tahay.
Waxay u eg tahay qori qallalay.
Eeg sawirkan. Keebaa cayayaanka ah ?
Keebaase qorigii ah ?

Dadkuna way is ilaaliyaan.
Cadawgooda ayey iska ilaaliyaan.
Sidee bay isaga ilaaliyaan ?



Guryo ayay dhistaan.
Hub ay isku ilaaliyaan bay samaystaan.,
Cadawgooda way ka dhuuntaan.
Cadawgooda way ka cararaan.



DHIRTU WAY IS ILAALISAA

Xayawaan badan baa cuna dhirta.
Dadkuna waxay cunaan dhirta qaarkeed.
Labaduba waa u cadaw dhirta.
Sidee bay dhirtu isaga dhicisaa cadawgeeda ?



Dhirta qaar baa leh qodxo dhaadheer.
Xayawaanku ma cunaan dhirta qodxaha
dhaadheer leh.
Waayo ?



Miraha dhirta qaar baa leh
qodxo yar yar.
Waxa ka mid ah cananiska.
Mirihiisu waxay dusha ku leeyihiin caleemo fiiqan.
Xayawaanku ma cuno miraha noocaas ah.




Dhirta qaar baa leh dheecaan qaraar.
Xayawaanku ma jecla inay mirahooda cunaan.



Dhirta qaar baa leh dheecaan sun ah.
Qaarkoodna waxay leeyihiin ur qarmuun.
Xayawaanku midna ma cunaan.




Xayawaanka biyaha ku nool



Weli ma cuntay kalluun?
Halkee baa laga soo qabtaa?
Kalluunku berriga ma ku noolaan karaa?
Waayo?

Ugaarteenna waynu dhaqaaleynaa.




Xayawaanku wuxu u baahan yahay
in dadku dhaqaaleeyo.

Dhirtu waxay u baahan tahay in aynu dhaqaalayno.



Dhirta biyo ayeynu siinnaa.



Dhirta Carrada ayeynu u jilcinnaa.



Dhirta Cudurrada ayeynu ka buufinnaa.

Dhirta waxaynu ka ilaalinaa
Waxyaalaha cuna.



Dhirtu waxay u baahan tahay in la dhaqaaleeyo.

WAXA NOOLI HALKEE BUU KU NOOLAAN KARAA?

Waxa nooli way fara badan
yihiin.

Waxay ka kooban yihiin dhir
iyo xayawaan.

Waxay ku noolaan karaan meelo
badan oo kala duwan.

Berriga iyo biyahaba way ku
noolaan karaan.

Xayawaanka berriga ku nool

Xayawaan fara badan ayaa
berriga ku nool.


Waxa ka mid ah dadka,
xoolaha iyo ugaarta.




Xayawaanka qaarkood waxay
ku noolaadaan meelaha kaynta
ah.

Fiiri sawirkan.

Maxaad ku aragtaa ?



Qaarna waxay ku noolaadaan
bannaanka.
Dadku meelo badan buu
ku noolaan karaa.



Xayawaanka qaarkood baa carrada
dhexdeeda ku nool.

Waxa ka mid ah dirxiga.

Bal tag meel ciid laga
qodayo ama beer la falayo.


Xayawaan yaryar ma ku aragtaa?

Kuwee baa ka mid ah?

Tiri inta nooc ee aad
aragtid.

Raadi magacyadooda.

Xayawaanku wuxu u baahan yahay
in aynu dhaqaalayno.




Xoolaheena biyo ayeynu siinnaa.

Xoolaheenna cunto ayeynu siinnaa.

Xoolaheenna Cadawga ayeynu
ka ilaalinaa.



Nibirigu wuxu ku nool yahay
badda.
Nibirigu ma aha kalluun.
Muxuu yahay ?



Eeg sawirkan.

Maxaad ku aragtaa ?
Yaxaasku wuxu ku nool
yahay biyaha.
Webiyada ayaa laga helaa.
Ma ku noolaan karaa badda ?
Waayo ?

Magacaw xayawaan kale
oo webiga ku nool.



Meel biyo-fariisin ah tag.

Fiiri in rah ku jiro
biyaha dhexdooda.
Kuwa kale ka fiiri biyaha
qarkooda.

Maxay taasi ku tusaysaa ?

Rahu berriga iyo biyahaba
wuu ku noolaan karaa.

Sheeg xayawaan kale oo
biyaha iyo berrigaba
ku noolaan kara.

Dhirta berriga ka baxda

Xayawaanku wuxu ku noolaan
karaa meelo badan oo kala
duwan.

Maxaad dhirtana ka filaysaa ?

Eeg sawirkan.

Halkee bay dhirtani ku
nooshahay ?



Dhirta qaar baa ka baxa
meelaha dhagxaanta leh.

Waxa ka mid ah kuwa aad
sawirkan ku aragtid.

Goor walba dhir kala nooc ah
baad aragtaa.

U fiirso meelaha ay ka
baxayaan.

Kuwee baa bannaanka ka baxa ?

Way badan yihiin.

Magacaw qaar ka mid ah.

Meel buur ah tag.

Fiiri dhirta ka baxda.

Soo ururi kuwo ka mid ah.

Raadi magacyadooda.



Dhirta qaarkood baan carrada
ka bixin.

Ma run baa mise waa been ?

Fiiri sawirkan.

Maxaad ku aragtaa ?

Dhirta qaar baa dhirta
kale ka dul baxa.

Raadi kuwo noocaas ah.

Dhirta biyaha ku nool


Dhirtu berriga oo keliya uun
kama baxdo.

Hadda haro ama webi
soo eeg.

Waxad arki dhir badan oo
biyaha ka dhex baxday.

Kuwee baa ka mid ah ?

Soo ururi qaarkood oo raadi
magacyadooda.



Dhir fara badan baa ku nool badda.

Kuwaasi ma ka bixi karaan
webiga ?

Ma ka bixi karaan berriga ?

Waayo ?

